

Sharciga Difaaca Sir Bixiyaasha

MAINE
DEPARTMENT OF
LABOR

Bureau of Labor Standards

Sharciga Difaaca Shaqaalaha Soo sheega ama Diida Samaynta Fal Sharci daro ah Boorkaan wuxuu qeexayaa qaar kamid ah qaybaha muhiimka ah ee sharciyada.



Nuqulka sharciga saxda ah ama turjumaada rasmiga ah ayaa laga heli karaa Waaxda Shaqaalaha, Laanta Sharciyada Shaqaalaha adoo wacaaya 207-623-7900.

(Sharciyada ayaa sidoo kale ku jira webseedka Laanta.)

Sharciga Maine (Farqada 26 M.R.S.A. § 839) ayaa qasab ka dhigaaya in loo shaqeeye kasta uu boorkaan ku dhajiyo goobta shaqada gaar ahaan meel ay shaqaaluhu si fican u arki karaan.

Boorkaan ayaa looga heli karaa barta oonleenka ah si bilaash ah waxaana laga samaysan karaa nuqul: <https://www.maine.gov/labor/posters/>

Waa sharci daro in batroonigaagu shaqada kaa cayrsho, kuu hanjabo, kaa aargoosto ama kuula dhaqmo si kaduwan shaqaalaha kale sabab la xariirta:

1. Inaad soo sheegtay xadgudub sharci;
2. Aad tahay shaqaalaha daryeelka caafimaadka aadna soo sheegtay khalad caafimaad;
3. Aad soo sheegtay wax khatar gelinaaya caafimaadka ama badqabka qof;
4. Aad diiday inaad samayso wax khatar gelinaaya noloshada ama nolosha qof kale aadna ka codsatay loo shaqeeyahaaga inuu saxo; ama
5. Aad qayb ka ahayd baaritaan ama dhagaysi ay samaysay dawladu.

Waxaa ku difaacaaya sharciga KELIYA haddii:

1. Aad cilada u sheegtay batrooniga aadna siisay waqti ku filan si uu u saxo; ama
2. Aad hayso sabab macquul ah ood ku aaminto in batroonigaagu uusan khaladka sixi doonin.

Si aad u soo sheegto xadgudub, xaalad badqab la'aan ah ama fal ama ficil sharci daro ah oo ka dhacaaya goobtaada shaqada, la xariir:

(Xogtaan waxaa buuxin doona loo shaqeeyaha)

(Magaca)

(Darajada)

(Goobta ama Taleefanka)

Si aad u hesho xog dheeraad ah ama aad u gudbiso cabasho sharcigaan qusaysa, la xariir:

Gudigga Xaquuqda Aadanaha ee Maine
51 State House Station Augusta, Maine 04333
Taleefanka: 207-624-6290
isticmaalayaasha TTY ha wacaan Maine Relay 711
www.Maine.gov/mhrc

Wakaaladaha soo socda ayaa xog muhiim ah ka bixin kara sharciyada badqabka goobta shaqada iyo shaqaalaha:

Qaybta Mushaarka iyo Saacada ee
Waaxda Shaqaalaha Maraykanka
P.O. Box 554 Portland, Maine 04112
Taleefanka: 207-780-3344
www.dol.gov

Maine Department of Labor
Bureau of Labor Standards
45 State House Station Augusta, Maine 04333-0045
Telefoonka: 207-623-7900
Isticmaalayaasha TTY ha wacaan Maine Relay 711.
Webseetka: www.maine.gov/labor/bls
Iimeelka: bls.mdol@maine.gov

Maine Department of Labor Bureau of Labor Standards
45 State House Station Augusta, Maine 04333-0045
Telefoonka: 207-623-7900
Isticmaalayaasha TTY ha wacaan Maine Relay 711.
Webseetka: www.maine.gov/labor/bls
Iimeelka: bls.mdol@maine.gov

Waaxda Shaqaalaha ee Maine ayaa ku bixisa fursad loo siman yahay shaqada iyo barnaamijyada. Kaabeyaasha iyo qalabka kaalmaatiga ah ayay heli karaan dadka naafada ah markay codsadaan.